



Warbixin ku saabsan caabuqa koroona

Waa maxay Koronavirus?

Caabuqa 'coronavirus' – oo sidoo kale loo yaqaan Sars-CoV-2 - waa fayras markii ugu horreysay ka soo is baxay suuq ku yaal magaalada Wuhan ee dalka Shiinaha, bishii Diseembar 2019-kii. Waxaa lagu kala qaadi karaa dhibic uu qofba qof u gudbiyo, tusaale ahaan, hadlka, qufaca ama hindhisada ayaa keenta. Sars-CoV-2 hadda waxa uu gaaray adduunka oo dhan. Xanuunka uu keeno waxaa lagu magacaabaa COVID-19. Wuxuu ku imankaraa qaabab kala duwan iyo darajooyin kala adag. Waxayna ku xirantahay habka cudurka, COVID-19 wuxuu noqon karaa hargab caadi ah, balse sidoo kale oof-wareen khatar ah. Ereyga Korona waa Latin macnaheedu waa ubax ama taaj. Waxay ka timi muuqaalka fayraska, oo ubax u eg.

Sidee ayaa lagu qaadi karaa caabuqa korona?

Caabuqa ayaa qofba qof u gudbiyaa. Wuxuuna u dhacaa, tusaale ahaan, markaad la qufaco, la hadlo ama qofku uu qof kale gacan qaado.

Sideed lagu ogaan karaa inuu qofku qabo caabuqa?

Haddii aad leedahay fayraska loo yaqaan 'koronavirus', waxaa kugu dhacaya tusaale ahaan, qufac, cuna xanuun, sanko oo dareera, madax xanuun ama jir xanuun iyo qandho ka sarreysa 38 ° C. Calaamaduhu waxay aad ugu egyihiin kuwa hargabka. Dad badan, dareenka urta iyo dhadhanka ayaa si ku meelgaar ah hoos u dhaca ama gebi ahaanba ka taga. Dadka qaarkood sidoo kale waxay yeeshaan shuban waxay kale oo ay leeyihiin calool xanuun ama lallabbo. Dhibaatooyinka neefsashada, boronkiitada, ama oof-wareenka ayaa sidoo kale noqon kara astaamaha caabuqa korona.

Calaamadaha ugu horreeya badanaa waxay soo if-baxaan shan illaa lix maalmood ka dib cudurka. Balse sidoo kale waxay qaadan kartaa ilaa 14 maalmood ka hor intaadan astaamaha isku arkin.

Haddii aad yeelato astaamo, wac dhakhtarkaaga guud. Dhakhtarkaaga ayaa markaa go'aaminaya, inaad u baahan tahay baaritaanka korona. Haddii dhaqtarkaaga guud aan la heli karin, wac adeegga heeganka caafimaadka ee 116 117.

Haddii aad leedahay calaamado caabuqa korona, waa inaad guriga joogtaa oo aad ka fogaataa xiriirka dadka kale.



Maxaa halis ka dhigaxs Koronavirus-ka?

Dadka badankood wuxuu cudurku u saameeyaa si fudud. Balse, sida laga soo xigtay Machadka Robert Koch, ku dhowaad 20 boqolkiiba dadka uu saameeyeen waxay la kulmaan saamayn daran oo cudurku la socda. Haddii saamayntu daran tahay, astaamaha ayaa badanaa ka sii dara toddobo ilaa toban maalmood ka dib, dadkana waxaa dhiba neefsashada ama waxay yeeshaan oof-wareen. Illaa iyo hadda, dadka waayeelka ah iyo dadka horey u xanuunsanaa ayaa inta badan u dhintey caabuqa.

Maxaan sameeyaa haddii aan yeesho astaamaha xanuunka?

Haddii aad qandho leedahay, qufacayso, ama neefsashadu kugu adag tahay, waa inaad wacdaa dhakhtar oo aad ballan ka samaysataa. Dhakhtarkaaga ayaa sidoo kale go'aamin doona inaad u baahan tahay sameynta baaritaanka korona. Xiliyada furitaanka dhakhtarka ka baxsan, waxaad wici kartaa adeegga heeganka caafimaadka ee lambarka taleefanka guud ee dalka oo dhan 116 117. Ka fogow xiriirka dadka kale una jirso ugu yaraan 1.5 ilaa 2 mitir dadka kale. Joog guriga ama qolkaaga. Ku qufac oo ku hindhis xagasha gacantaada ama masar, kaas oo aad isla markiiba ku ridi doonto qashinka.

Si joogto ah u dhaq gacmahaaga. Hagaha sida loo dhaqmo marka uu ku saameeyo COVID-19 waxaa laga heli karaa machadka [Robert Koch](#).

Maxaan sameeyaa haddii aan xiriir la yeeshay qof qaba cudurka?

Haddii aad xiriir shaqsiyeed la yeelatay qof qaba cudurka loo yaqaan 'koronavirus', gurigaaga tag iyadoon loo eegin astaamaha si dhakhso ah u wac [Gesundheitsamt.ga](#) deegaankaaga. Wadahadal shaqsi ah ka dib, waxay kugu la talin karaan talaabooyinka xaaladaada shakhsi ahaaneed waxayna go'aansan karaan talaabooyinka dheeraadka ah ee loo baahan yahay. Khadka ayaa laga yaabaa inuu mashquul yahay haddii dad aad u tiro badani ay isla mar wacayaan. Xaaladdan oo kale, fadlan wac [Wasaaradda Caafimaadka ee Federaalka](#): 030 346 465 100. Talada ayaa lagu bixiyaa afka Jarmalka oo keli ah.

Haddii aad ku nooshahay xerada qaabilaadda ama xarunta hoyga la wada deganyahay, si dhakhso leh u wargeli maamulka xarunta ama daryeelka. Una sheeg tusaale ahaan dugsigaaga, iskuulka luqadda, goobta tababarka ama goobtaada shaqo.